AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Waxbarashada dugsiga

Waxbarashada dugsiga hoose iyo tan sare ee Australia waxay u-qaybsan tahay laba qaybood – dugsiyada dowladda iyo dugsiyada gaarka ah.

## Dugsiyada dowladda

Badiba carruurtu waxay dhigtaan dugsiyada dowladd iyo kuwa dowlad-goboleedyada kuwaas oo waxbarashadu ay lacag la'aan tahay, inkastoo ay jiri karaan qarashyo dheeraad ah sida buuggagta, yunifoomka, iyo ujrooyinka maamuleed oo kale. Haddii aadan awoodin inaad bixiso qarashyadaas waxaad kala hadli kartaa maamulka dugsiga.

## Dugsiyada gaarka ah

Dugsiyad gaarka ah waxaa guud ahaan wada haya'daha diimeed (tusaale, kaniisadaha Kaatooligga, Anglican, Lutheran, ama Protestant ah) ama waxaa wada hay'do madaxbannaan. Waxaa kaloo jira tiro yar oo dugsiyada Yuhuudda iyo kuwa Islaamka. Badiba dugsiyada gaarka ah waxay qaadaan ujrooyin sarsare.

## Dugsi ku-qoridda

Qofka caseworker-kaaga ama proposer-kaagaayaa kugu caawin doona inaad ilmahaaga ku qorto dugsiga. Waxaad u baahan doontaa inaad tusto **dokumantigii safarkaaga,** iyo **diiwaanka tallaalka ilmahaaga** wixii **warbixino** dugsiga iyo **shahaadooyinka** waxbarashadii hore.

Carruurta Australia waxaa sharci ahaan looga baahan yahay inay dugsi dhigtaan inta u dhaxaysa da'da shan iyo 17 sano. Waxay dhamaystaan lix ama toddobo sano oo dugsi hoose ah iyo ugu yaraan afar sano dugsi sare ah. Badiba carruurtu waxay kaloo dhigtaan hal sano (waqti dhiman ah) oo malcamad ah ka hor intaysan gelin dugsiga hoose.

Carruurta waxaa lagu kala qoraa gareedyo ayadoo loo eegayo da'dooda; si kastaba ha ahaatee, waxaa jira faraqyo yaryar oo u dhaxeeya dowlad-goboleedyada iyo teritooriyada.

## Dhigashada dugsiga

Badiba dugsiyadu waxay leeyihiin afar teeramyada dugsiga aydoo sannad-dugsiyeedku ka bilowdo janaayo dhammaadkeeda uuna ku dhammaado ilaa Diseembar. Waxaa jira fasaxyada dugsiga oo u-dhaxeeya teeramyada dugsiga waxayna xirmaan fasax-weynaha dadweynaha. Badiba carruurtu dugsiga waxay dhigtaan ilaa lix saacadood maalintii, Isniinta ilaa Jumcaha. Dhigashada dugsiga waa muhiim waana qasab. Ardaydu markay gooyaan dugsiga, waalidiinta waxaa laga filayaa inay u-keenaan sharraxaad qoraal ah dugsiga.






Halkan dugsiyada Australia, carruurta ku kala duwan jinsiyadaha, diimaha iyo asalada dhaqan-dhaqaale si wadajir ah bay wax u wada-bartaan iskuna dhexgalaan fasalka dhexdiisa iyo inta lagu jiro nashaadyada fasalka dibaddiisa. Badiba dugsiyadu waa waxbarashada isku-dhafka ah taas oo macnaheedu yahay wiilasha iyo gabdhaha waxay wax ku bartaan isla fasalka dhexdiisa.

Carruurta u baahan taageero luqadda Ingiriisiga oo dheeraad ah waxay kaloo dhigan karaan fasallada (English as an Additional Language - EAL), badanaa dugsigooda dhexdiisa. Carruurta leh baahiyo gaar ah sida iimaha dhimireed ama jidheed waxay xaq la mid ah u leeyihiin waxbarashada sida carruurta kale. Kuwan waxaa ka mid ah carruurta kuwa dhagoolka ah, indhaha-la' ama qaba dhibaatooyinka waxbarashada ama dhaqaneed oo daran. Fasallada ardaydan waxaa badanaa lagu bixiyaa dugsiyada caadiga ah. Dugsiyada qaarkoodna waxay ku takhasusaan wax-baridda ardayda qaba baahiyaha gaarka ah.

Bareyaashu waxay carruurta ku dhiirigeliyaan inay wax ku bartaan garashada iyo baaridda. Way ka badan tahay keliya waxyaalaha oo la soo xafido. Ardaydu waxay ka-qaybgalaan ayagoo su'aalo weydiiya, ka-mid noqda niqaashka kana qaybqaataan nashaadyada, xataa haddii aysan ku hadlin Ingiriisi badan.

Carruurta waxaa lagu dhiirigeliyaa inay ka-qaybqaataan noocyo kala duwan fasallada dugsiga ah oo ay ka midka yihiin daraasadaha waxbarasho, barnaamijyada cayaaraha iyo nashaadyada muusikada. Dugsiyadu waxay kaloo qorsheeyaan nashaadyo dibad-baxyo iyo kaamam kuwaas oo siiya waayo-aragnimo dhab ah oo la xiriirta mowduucyadii lagu bartay fasalka dhexdiisa. Dhammaan dugsiyada oo dhan waxay wax ku baraan Manhajka Austaralia (Australian Curriculum). Waad arki kartaa waxa uu ilmahaagu ka baranayo dugsiga adigoo ka eega website-ka Australian Curriculum. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.australiancurriculum.edu.au

Waalidiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay ka qaybgalaan waxbarashada ilmahooda, tusaakle ahaan, ayagoo yimaada kulannada ay la leeyihiin baraha iyo ilmahooda, hubiyaan in ilmahoodu soo dhammeeyaan shaqo-guriga dugsiga iyo inay yimaadaan munaasabadaha dugsiga. Kala-hadlidda baraha ama maamulaha wax ku saabsan waxbarashada ilmahaaga iyo waayo-aragnimadooda guud ee xagga dugsiga waa wax aad loo aqbali karo. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.education.gov.au

## Xannaanada Ilmaha iyo waxbarashada hore

Xannaanada Ilmaha ama child-care-ka iyo waxbarashada hore waxay bixiyaan asaaska carruurta si ay ugu koraan beey'ad ammaan ah isla markii ayagoo helaya fursadda inay la bulsheeyaan carruurta kale. Marka lagu daro faai'dooyinka koritaanka sannadaha hore, child-care-ka iyo waxbarashada hore waxay kaloo ka caawiyaan qoysaska shaqeeya inay shaqada ku noqdaan. Macluumaadka dowladda oo ku saabsan adeegyada child-care-ka iyo qawaaniinta, caawimaadda lacageed, adeegyada carruurta qabta baahiyaha gaarka ah iyo carruurta ka soo-jeedda asallada dhaqanada kala duwan. Ka eeg www.mychild.gov.au

Ayadoo la siinayo daryeel, adeegyada child-care-ka iyo waxbarashada hore waxay ilmahaaga siiyaan inuu kor-u-qaado xirfadaha bulshadeed, caadifadeed iyo kuwa barashada. Macluumaadka dowladda oo ku saabsan khayaarada child-care-ka iyo waxbarashada hore waxaa laga heli karaa website-ka MyChild. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.mychild.gov.au/childcare-information/options






Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM